Su’aalaha inta badan la isweydiiyo ee ku saabsan waxqabadka galabti ee iskuulleyda

Ma la codsan karaa booska waxqabadka galabki sannad-dusgiyeedka dhexdiisa?
Waxaa hubanti badan in codsiga la sameeyo xilliga codsiga, laakiin booska waa la codsan karaa xittaa sannad-dusgiyeedka dhexdiisa. Mas’uulka ayaa lala xiriirayaa haddii boos la helo. Kala xiriir xaaladda booska isudduwaha soonihiina amajardiinada ciyaarta.

Ma codsan karaa kooxaha waxqabadka galabti oo badan?
Booska waxqabadka galabti waxaad ka codsan kartaa haddii aad dooneyso jardiinada ciyaarta iyo dusgiga. Haddii uu cunuggu boos ka helo labada kooxood, waa in uu mas’uulku baajiyaa labada boos midkood kahor inta uusan dugsigu billaaban. Codsiga waxqabadka galabti ee dugsiga waxaa la geyn karaa oo kaliya hal koox.

Waa maxey farqiga u dhexeeya baajinta iyo joojinta booska?
Baajinta booska waxqabadka galabti ee dugsiga waa in qoraal ahaan looga sameeyaa ugu dambeyn billowga sannad-dugsiyeedka cinwaanka **iltapaivatoiminta@hel.fi** Tan kaddib waxa laga hadlayo waa joojinta oo ay ku jirto wakhtiga joojinta oo bil buuxda ah. Tusaale ahaan haddii booska la joojiyo 6.10., joojintu waxey dhaqangaleysaa 1.12. Xaaladan marka lagu jiro waxaa macaamilka laga qaadayaa lacagta bisha Oktoobar iyo Nofembar.

Joojinta booska waxqabadka galabti ee jardiinada ciyaarta waxaa qoraal ahaan toos loogu gudbinayaa jardiinada ciyaarta ugu dambeyn bishi hore maalinta ay 15 tahay.

Sababtee ayuu cunuggaygu boos ugu helay goob waxqabad kale oo aanan codsan?
Dadka codsaday kooxcda aad codsatay ayaa ka badan boosaskeeda. Macluumaad dheeraad ah oo arrintan ku saabsan ayaa ku qoran warqadda boostada ee guriga loo soo diray.

Booska waxqabadka galabti ee cunuggayga miyaan koox kale u beddelan karaa?
Mas’uulku wuxuu joojin karaa booski hore islamarkaasna codsi cusub ayuu dhiagn karaa. Haddii uu cunuggu helo boos cusub, waxaa joojinta xageeda mas’uulka uga imaan karta bixinta labo lacagta macaamiisha ah oo isku wakhti ah. Haddii ay arrintu ka dhalatay isbeddel ku yimid dugsiga ama goobta deegaanka, la xiriir isudduwaha soonahaada.

Waxqabadka gelinka hore

Waxqabadka gelinka hore waa waxqabad loo qabanqaabiyo iskuulleyda yaryar kahor inta aysan maalin-dugsiyeedku u billaaban. Waxaa lagu qabanqaabiyaa dugsiyada hoose-dhexe ee magaalada ama jardiinooyinka ciyaarta ee dugsiyada agtooda ku yaal. Waxqabadka gelinka hore waa mid aan qasab aheyn oo lacag la’aan ah. Meesha quraac lagama bixiyo, laakiin cunuggu cunto ayuu gurigiisa ka soo qaadan karaaa. Macluumaadka dheeraadka ah ee waxqabadka waxaad ka heleysaa dugsiga.

Helsinki

Waxqabadka iskuulleyda ee gelinka hore - iyo galabti

Waxqabadka galabti ee iskuulleydu waa waxqabad wanaagsan oo dhinacyo badan leh, kaas oo dugsiga kaddib ka dhaca goob ammaan ah waxaana loo qabanqaabiyaa ardayda fasallada 1aad – iyo 2aad iyo carruurta heysata go'aanka taageerada gaarka ah. Waxqabadkan waxaa Helsinki dhexdeeda ka qeybqaata ugu yaraan tobanki ardayba sideed arday oo fasallada 1aad – iyo 2aad dhigta.
Waxqabadka galabti waxaa ku jira ciyaar iyo waxqabadka la hago oo isbedbeddela. Cunuggu wuxuu halkaas wakhti kula qaataa carruurta kale, wuxuu ka helayaa saaxiibo cusub wuxuuna ku baranayaa afka finnishka. Waxqabadka waxaa ku jira bannaan aadis maalin kasta ah. Adeegga lacagta ah waxaa ku jira cunto fudud.

Waxqabadka dugsiga dhexdiisa, dugsiga u dhow iyo tan jardiinada ciyaarta dhexdeeda ah

Waxqabadka galabti ee dugsiga waxaa qabanqaabiyaa dugsiyada, ururada, adeeg-bixiyayaasha gaarka ah iyo xer diimeedyada. Waxqabadka galabti ee dugsiga waxey wax u qabtaan qaab koox ah.

Waxqabadka galabti ee jardiinada ciyaartu waa waxqabadka carruurta ee wakhtiyada firaaqada oo ah mid la hago islamarkaasna la ilaaliyo.

Wakhtiga codsigu waa 18.3.–18.4.2019

Waxqabadka galabti waxaa la codsanayaa islamarkaasna la iska diiwaangelinayaa 18.3.–18.4.2019 waxaana booska warkiisa la helayaa ugu dambeyn dhammaadka bisha Juun.

Macluumaadyada xiriirka ee dugsiyada, goobaha waxqabadka galabti iyo isudduwaha soonaha waxaad ka heleysaa hel.fi/iltapaivatoiminta > Toimintapaikat.

Middee ayaa u wanaagsan cunuggaada?

Halkee ayeey saaxiibadu aadayaan?
Cunuggaadu ma wuxuu qabaa baahiyo gaar ah?
Cunuggu ma mid is maamulaa?
Cunuggaadu ma wuxuu qabaa faham xadeysan?

Goobta waxqabadka waa la tegi karaa si loo soo barto.
Xayeysiiska soonaha ayaad ka heleysaa goobaha waxqabadka galabti ee dugsigiina u dhow.

Waxqabadka iyo bixinta lacagta

Waxqabadka galabti ee dusgiyada illaa iyo saacadda 16 (4ta) galabnimo waa 100 €/bishi
illaa iyo saacadda 17 (5ta) galabnimo waa 120 €/bishi

Waxqabadka galabti ee jardiinada ciyaarta waxaa ku jira cunto fudud oo lacag la'aan ah ama mid lacag ah 36,10 €/bishi
Haddii dhakhliga qoysku uu yaryahay, waxaad codsan kartaa in lacagta lagaa khafiifiyo.

Waxqabadka galabti ▶
Goobaha waxqabadka ▶
Agabka luqadaha badan ▶

Codsashada waxqabadka galabti 2019–2020

Ku qor codsiga waxqabadka galabti ee dugsiga kooxda aad booska ka codsaneyso. Waxqabadka galabti ee jardiinada ciyaarta waxaa la isaga diiwaangeliyaa foom u gaar ah. Foomamku waxey ku qoran yihiin af finnish, iswidhish iyo ingriiis. Tilmaamaha buuxinta foomku waxey ku qoran yihiin af carabi, soomaali iyo ruush.

Janaayo

Maalinta iska diiwaangelinta dugsigu waa 23.1.2019

Macluumaad ku saabsan waxqabadka galabti ee soonahaada waxaad ka heleysaa xayeesiiska soonaha ama madasha warbixinta ee dugsigaada.

Maarso-Abriil

! **Codso waxqabadka galabti 18.3.–18.4.2019**
Foomka waxaa la celiyaa inta lagu jiro mudadi codsiga.

Foomamka waxaa laga helaa internteka, dugsiga iyo goobta waxqabadka galabti. Foomka waxaa loo celiyaa goobta waxqabadka ee la codsanayo.

Juun

Waxqabadka galabti iyo dugsiyaduba waxey xagaaga ku jiraan fasax. Jardiinooyinka ciyaarta waxaa ka jira waxqabadka xagaaga.

Foomamka yimaado wakhtiga codsiga kaddib waxaa laga baaraandegayaa laga billaabo bisha Agoosto iyo inta lagu jiro sannadka waxqabadka.

Luulyo

Waxqabadka galabti iyo dugsiyaduba waxey xagaaga ku jiraan fasax. Jardiinooyinka ciyaarta waxaa ka jira waxqabadka xagaaga.

Booska waxqabadka galabti waxaad baajin kartaa ugu dambeyn inta uu dugsigu ka billaabanayo.

Agoosto-Sebtembar

Waxqabadka galabti waxey la billaabataa islamarkaasna la dhamaataa dugsiyada.

Haddii uu dhakhliga qoysku yaryahay, waxaad codsan kartaa in lacagta lagaa khafiifiyo ama lagaa daayo, marka uu biilka ugu horeeya kuu yimaado.